# Sadex iyo Tobanka Su'aalood ee Caamka ah ee ku saabsan Codaynta Dhamaan Dadka Sharciga Ku Degan Doorashada Deegaanka Burlington

**Wixii macluumaad dheeraad ah:** www.burlingtonvt.gov/AllLegalResidentVoting

## 1. Sababta iyo sida Magaalada Burlington ay u doonayso inay ugu darto codaynta dhamaan Dadka Sharciga Ku Degan doorashada deegaanka Burlington?

Ka qaybgalinta dhamaan codeeyayaasha Sharciga Ku Degan nidaamka dimuqraadiyada waa tiir Dastuurka Maraykanka, waxayna xoojisaa dareenka xoogan ee qaran ee ka qaybgalinta shacabka. Magaalada Burlington waxay leedahay taariikh ahaan bulsho xooggan oo siyaasadda ka qaybgasha. U ogolaanshaha dhamaan Dadka Sharciga Ku Degan inay codeeyaan doorashooyinkeena deegaanka waxay siisaa cod xubnaha bulshada ee degan, ka shaqeeya, ee cashuurta ku bixiya Burlington.

Dhawaan, Winooski iyo Montpelier waxay u codeeyeen inay u ogolaadaan dhamaan Dadka Sharciga Ku degan inay codeeyaan doorashooyinka deegaanka oo Xeer Dejiyayaasha dhaqan gelintooduna waxay ka heshey taageero xoogan Vermont oo dhan marka la eego codaynta Dadka Sharciga Ku Degan ee doorashooyinka deegaanka.[1]

Dhamaan Dadka Sharciga Ku Degan waxay codayn karaan Burlington Maarso 2023 oo hadii codeeyayaasha iyo Xeer Dejiyayaashu ay ansixiyaan, dhamaan Dadka Sharciga Ku Degan waxay u qalmi doonaan inay codeeyaan doorashada mustaqbalka ee dawlada hoose iyo gudida maamulka dugsiga hadii ay duwaan gashan yihiin.

## 2. Yuu saamaynayaa isbadalku?

Dhamaan Dadka Sharciga Ku Degan Magaalada Burlington waxaa loo ogolaanayaa inay u codeeyaan musharixiinta deegaanka iyo su'aalaha deegaanka kadib markay isduwaangeliyaan. Burlington waxaa weeye meel ay degan yihiin dad sharci ku degan oo ka yimid caalamka oo dhan, oo waxaa kamid ah, Canada, Ireland, iyo Germany. Sida lagu ogaaday xogta 5 sano ee Xog Uruurinta Bulshada Maraykanka 2020, 5.5% dadka degan Magaalada Burlington waa dad si sharci ah ugu nool. Sidoo kale, 5.1% oo shacabka Magaalada ah ayaa ka qaaday dhalashada.

## 3. Yaa u qalma inay codayso?

Dadka 18 sano jirka ah iyo wixii ka wayn maalinta doorashada ee sida sharciga ah ku degan Maraykanka ee degan Magaalada ee doonaya inay ku noolaadaan ayaa u qalmaya inay isku duwaan geliyaan inay codeeyaan. Tusaale ahaan, dadka haysta giriin kaadhka, dadka degan ee haysta ruqsada shaqo ee sharciga ah, ama Dadka Iyagoo Carruur ah Waddanka Yimi (Deferred Action for Childhood Arrivals, DACA). Marka qofku is duwaan geliyo, wuu codayn karaa.

[1] Ka eeg joornaalada Golaha Wakiilada Vermont iyo Sanatka wixii ku saabsan ansixinta biilka Montpelier (Aqalkeeda Bogga. 3, Sanatka bogga. 25) iyo Winooski (Aqalkeeda bogga. 4, Sanatka bogga. 26).

## 4. Maxay awoodaan Dadka Sharciga Ku Degan inay u codeeyaan?

Qorshuhu waxaa weeye in loo ogolaado dhamaan Dadka Sharciga Ku Degan inay u codeeyaan Duqa, Golaha Deegaanka Magaalada, xubnaha Gudida Maamulka Dugsiga, saraakiisha doorashada iyo shayo looga codaynayo Magaalada Burlington. Dhamaan dadka Sharciga Ku Degan looma ogolaanayo inay codeeyaan doorashooyinka gobolka ama federaalka.

## 5. Codeynta Dadka Sharciga ku degan ma wax cusubaa?

**Maya.** Dhamaan codeynta dadka degan waxa weeye taariikh dheer oo ay leedahay Vermont. Qarnigii 18aad, may jirin wax shuruudo ah oo saaran oo muwaadinimo ah dadka codaynaya. Laga bilaabo 1828, gobolo badan, oo ay ku jirto Vermont, ayaa sheegey inay soo rogeen shuruudaha muwaadinimada dadka u qalma inay ka codeeyaan gobolka iyada oo lagaga jawaabayo tirada dadka badan ee soo galaytiga ah, gaarka ahaan ka yimid Ireland iyo Galbeedka Yurub. Laakiin, goboladan iyo bulshooyinku waxay u ogolaadeen Dadka Sharciga Ku Degan inay sii wadaan codaynta heer deegaan. Isbadalka caqdiga ee la soo jeediyey waxa uu raadinayaa inuu balaadhiyo xuquuqda codaynta ee shakhsiyaadka sida sharciga ah halkan ku jooga oo sheegta in Burlington ay tahay meesha kowaad ee ay degan yihiin.

## 6. Magaalooyinkee kale ee Vermont iyo Maraykanka ah ayaa loogu ogol yahay Dadka Sida Sharciga ah Ku Degan inay ka codeeyaan?

Vermont, magaalooyinka Winooski iyo Montpelier waxay sameeyeen codaynta Dadka Sharciga Ku Degan doorashooyinka dawlada hoose iyo dugsiga 2021.

Vermont wixii ka baxsan, ugu yaraan 13 dawlad hoose oo kale ayaa u ogolaaday Dadka Sharciga Ku Degan inay codeeyaan. Waxaa kamid ah magaalooyinka New York City iyo San Francisco iyo magaalooyinka yaryar sida Tacoma Park, Maryland iyo Somerset, Washington.

## 7. Waa maxay waddamada kale ee caalamka ee loogu ogol yahay Dadka Sida Sharciga Ku Degan inay ka codeeyaan?

Maraykanka wixii ka baxsan, meelaha Dadka Sharciga Ku Degan ee Aan Dhalashada Haysan ee codayn kara doorashooyinka deegaanka waxa ka mid ah Canada, Argentina, Austria, Barbados, Brazil, Chile, Czech Republic, Greece, Hong Kong, Iceland, iyo Lithuania.

## 8. Qof Sharci Ku Degan Ahaan, waa maxay saamaynta ay igu yeelan karto iminka inaan awoodi karo inaan codeeyo marka loo eego marka aan maro nidaamka qaadashada dhalashada kadib?

In badan oo ka mid ah Dadka Sharciga Ku Degan inay qaataan Dhalashada Maraykanku waxay noqotaa hawl murugsan, oo wakhti badan ka cunto oo kharash badan. Dadka Sharciga Ku Degan waxaa loo ogolaanayaa inay codeeyaan doorashooyinka deegaanka kahor inta ayna nidaamkan gelin, taas oo siisa fursad dheeraad ah oo qofka uu ku dooran karo iminka cida matalaysa, arrimaha, iyo siyaasada saamaynaya noloshooda iyo bulshadooda.

## 9. Miyaan, codeeye ahaan Si Sharci ah U Degan, u tartami karaa xafiis deegaanka ah, hadii Caqdigu is badalo?

**Haa**. Marka qofka degan uu isku duwaan geliyo codeeye, qofkaas waxa uu u tartami karaa xafiis deegaanka ah.

## 10. Miyaa codayntu ka hor imanaysaa sharciga federaalka ama keeni kartaa ku xad gudub fiisahayga ama giriin kaadhkayga?

**Maya.** 18 U.S.C. § 611 waxa uu u ogol yahay Dadka Sharciga Ku Degan inay ka codeeyaan meesha "loo ogol yahay inay ka codeeyaan sida uu dhigayo dastuurka ama xeerarka Gobolku ama deegaanka." Waa tan waxa la soo jeediyey.

## 11. Hadii Qof Sharci Ku Degan ahaan aan isku duwaan geliyo in aan codeeyo, miyaa macluumaadkayga isku duwaan gelinta codayntu noqonayaan qaar cid walba arki karto?

**Haa.** Magaaladu waxay haysan doontaa laba liis oo kala duwan: (1) liiska codeeyayaasha u duwaan gashan gobolka iyo federaalka iyo (2) liiska codeeyayaasha u duwaan gashan dawlada hoose ee dhamaan codeeyayaasha u qalma ee Burlington. Labada liisba waxaa weeye duwaan dadku heli karaan oo la heli karo marka ay dalbadaan dadwaynuhu; laakiin macluumaadka qaar ayaa laga reebi doonaa, oo ay ku jirto (a) bisha iyo maalinta dhalashada (b) liisanka darawalnimada ama lambarka aqoonsiga cidda aan dirawal ahayn (c) lambarka taleefanka (d) cinwaanka iimeelka, iyo e) lambarka Sooshiyaal Sikiyuuritiga.

## 12. Qof Sharci Ku Degan Ahaan luuqadayda kowaad maaha Ingiriisi. Miyay jiri doontaa turjubaad iga caawinaysa inaan fahmo waxa loo codaynayo?

**Haa.** Waraaqaha codaynta ee muunadda ah waxaa loo turjubi doonaa 6 luuqadeed ee ugu sareysa ee ay ku hadlaan Bulshada Soo Galaytiga iyo Qaxootiga ee Magaaladu. Waxaa weeye Nibaali, Soomaali, Sawaaxili Fiitnaamiis, Faransiis iyo Carabi. Kuwan waxaa la heli karaa kahor Maalinta Doorashada oo waxaa laga heleyaa goobaha doorashada.

## 13. Goorma ayaa Dadka Sharciga Ku Degan ay isku duwaangelin karaan inay codeeyaan haddii isbadalkan caqdiga ay ansixiyaan codeeyayaasha iyo Xeer Dejiyayaashu?

Vermont waxay leedahay duwaan gelin isla maalintaas ah oo codeeyayaasha ah, taas oo ka dhigan in dadka u qalma inay codeeyaan ay isku duwaan gelin karaan inay codeeyaan Maalinta Doorashada ama kahor, hadii ay:

- sharci ku degan yihiin Maraykanka
- ayna ka yarayn 18 sano jir
- degan yihiin Magaalada Burtlingon
- iska duwaan geliyeen inay codeeyaan Gudida Duwaangelinta Codeeyayaasha oo ay mareen Dhaarta Codeeyaha.